# *Xogta Kooban ee Qiimaynta Kormeeraha Guud*

*Qoraal lagasoo Xigtay BSR-5:*

*Dukumiintiga qiimaynta ayaa ka koobnaan doona:*

*1. Xogta kooban ee macluumaadka lagusoo aruurshay sanadka oo dhan kormeerida xeerarka Guddiga Waxbarashada ee ku aadan Dhammaadyada iyo Xadiyada Awoodaha Fulinta;*
*2 Gabogabada in in Dhamaadka xeer kasta (higsiga) la gaaray ama in hormar macquul ah laga sameeyay gaaristiisa;*
*3. Gabo-gabo la xariirta in Kormeeraha guud uu si sax ah ugu shaqeeyay xaduudaha uu u dijiyay Gudigu ee xeerarka xadiyada awoodaha Fulinta; iyo*
*4 Xogta kooban ee guulaha iyo meelaha uu ka gaabiyay kormeeraha guud ee la xariira gaarista Higsiyada xeerarka (yoolalka) iyo shaqada gudaha xadiyada uu aasasay Gudigu ee la xariira xeerarka Xadiyada Awoodaha Fulinta.*

—----------

"Sinaanta isirka iyo waxbarashada ayaa ah masuuliyad wadareed na wada saaran. Waxaan gaari doonaan sinaan marka aan baabi'ino nidaamyada qotoda dheer ee ku dhisan gumaysiga kuwaasoo horay u abuuray sinaan la'aan ka jirta helitaanka iyo qoondada fursadaha iyo khayraadka dadka matalaaya bulshooyinka la duudsiyo, ayna ku jiraan isirka, qoomiyada, aqoonsiga jinsiga, dookha galmada, luuqada iyo awooda. Waxaan abuuri doonaa xaalado aan dhammaanteen qayb ka nahay, ka tirsan nahay, aan ku leenahay damac cad (sabab) aana xoriyad u haysano inaan hogaamino meelaha na quseeya. Marka aan abuurno xaaladahaan, waxaan baabi'inaynaa qiyaasta guusha ama fashilka ee ardayda iyo shaqaalaha."

Waagii hore, ma jiri jirin shuruudo qiimayn oo nidaamsan oo lagu qiimeeyo Kormeeraha guud, marka qiimaynada ayaa iska ahaa kuwo guud oo keliya. Hadda, xubnaha Gudigga iyo Kormeeraha ayaa leh hanaan qiimayn oo cadaalad ah, lagasii baaraan dego oo higsi leh. Bishii Nufeembar 2021, Guddiga Waxbarashada ayaa ansixiyay naqshada maamulka iyo isla xisaabtan cusub wuxuuna aqoonsaday shan Xeerarka higsiga ah si loo taageero higsiga Kormeeraha ee ah in arday kasta uu guul gaaro. Higsiyadaan mudada fog waa kuwo hami ku dhisan dabiiciyan waxayna siinayaan kormeeraha guud xoriyad uu ku xusho qaababka uu u gaaraayo higsiyada.

Si waafaqsan naqshada isla xisaabtanka, ma Kormeere guud ahaan, Dr. Alex Marrero ayaa soo aruuriyay xog ku saabsan degmada, usoo bandhigay xogta bulshada, kana shaqeeyay abuurista Tub cusub oo Istaraatiiji ah. Intii lagu jiray sanad dugsiyeedkii 2021-22, Gudiga ayaa dib u eegis ku sameeyay warbixinnada hurdhaca ah ee kormeerka iyo xogta aasaasiga ah intii lagu jiray kulannada dadwaynaha kadibna, ayagoo u codeeyay aqbalaada warbxinnadaas, xubnaha Gudiga ayaa aqbalay talooyinkaas.

Laga bilaabo sanad dugsiyeedka 2022-23, Guddiga Waxbarashada ayaa sii wadi doona inay helaan warbixinnada kormeerka bil kasta ayadoo lagu salaynaayo natiijooyinka halkii lagu salayn lahaa hormarka laga gaaray yoolal gaar ah. Xubnaha gudiga ayaa u adeegsan doona warbixinadaan qayb ka mid ah qiimaynta Kormeeraha guud waxayna tilmaan joogto ah ka siin doonaan Kormeeraha guud kadib falcelintaan macnaha leh. Cabiradaan ayaa aasaas u ah dedaalka, Guddiga Waxbarashada ayaana sanad kasta ansixin doona qaybo cusub oo kamid ah cabirada.

***Xogta Kooban ee guulaha la xariira shaqada laga qabtay xadiyada uu Gudigu u sameeyay xeerarka Higsiga***

- Erayada ayaa muhiim ah. Halkii dugsiga loo qaybin lahaa "waaxo." Dr. Marrero ayaa ku magacaabay dugsiyada waaxda ku wadajira "dugsiyada iskaashatada ah". Isbadelkaan lagu sameeyay eray bixinta ayaa muujinaaya isbadel ku yimid falsafada taasoo diirada saaraysa mulkiyad wadareed iyo masaalix guud oo ku aadan natiijooyinka wanaagsan ee ardayda, macalimiinta iyo qoysaska. Tusaale, Dr. Marrero wuxuu shaqadii ka wareejiyay Waaxda Sinaanta, wuxuu sinaanta ka dhigay masuuliyad saaran Degmada oo dhan wuxuuna diirada saaray ardayda luuqadaha badan barta asagoo aqoonsigooda u sameeyay istaraatiijiyad.

- Dr. Marrero ayaa si firfircoon oo hami leh uga shaqeeyay badelida xariirka ku dhexeeya shaqaalaha ka shaqaynaaya xafiiska dhexe iyo shaqaalaha ka shaqeeya dugsiyada asagoo cadeeyay sida dhammaan shaqaaluhu u yihiin macalimiin iyo in dhammaan shaqooyinka laga qabto degmada dugsiga ay u adeegayaan ardaydeena.

- Qorashada iyo joogtaynta macalimiinta Latinx ka ah ayaa wali muhiimad u ah Dr. Marrero waxaana lagu daray Tubta Cusub ee Istaraatiijiyada degmada dugsiga. Dedaalkaan lagu doonaayo in lagu shaqo geliyo macalimiinta dheeriga ah ee Latinx ka, oo ay la socoto balaarinta daraasaadka isirka iyo bixinta adeegyada dheeriga ah ee caafimaadka Dhimirka, ayaa saamayn wanaagsan ku reebi doonta ardaydeena.

- Ayadoo la adeegsanaayo waxbarashada, wada shaqaynta degmada oo dhan iyo u doodista xquuqaha, Dr. Marrero ayaa sii wada inuu hormariyo mashruucyada bulshooyinka LGBTQIA+, inuu iskaashi ka dhex abuuro macalimiinta iyo ardayda, iyo inuu abuuro goob hami gelinaysa dhammaan xubnaha bulshada Dugsiyada Dowladda ee Denver.

***Xogta Kooban ee aagaga laga gaaray guulaha la xariira shaqada laga qabtay xadiyada uu Gudigu u sameeyay xeerarka Higsiga***

- Qorashada iyo joogtaynta macalimiinta Madowga ah ka ayaa wali muhiimad u ah Dr. Marrero waxaana lagu daray Tubta Cusub ee Istaraatiijiyada degmada dugsiga. Dedaalkaan lagu doonaayo in lagu shaqo geliyo macalimiinta dheeriga ah ee Madowga ah, oo ay la socoto balaarinta daraasaadka isirka iyo bixinta adeegyada dheeriga ah ee caafimaadka Dhimirka, ayaa saamayn wanaagsan ku reebi doonta ardaydeena.

***Faalooyinka Kale***

Inkastoo aan Gudigu uusan qiimaynta hadda ku salaynayn Xadiyada Awooda Fulinta ama arimo aan ahayn kuwo la xariira Xeerarka Higsiyada Gudiga, Gudigu wuxuu doonayaa inuu aqoonsado aagaga dheeriga ah ee guusha laga gaaray iyo aagaga dheeriga ah ee kobaca u baahan ayadoo ujeedadu tahay in la helo hanaan leh hufnaan dheeri ah.

*Meelaha Guusha laga Gaaray*

- Marka lagasoo tago Kormeerka Dhagaysiga iyo Waxbarashada, Dr. Marrero ayaa booqday ku dhawaad 70 dugsi wuxuuna ku qabtay in ka badan 100 kulan xaafad kasta oo kamid ah magaallada ntii lagu jiray 100 kii maalmood ee ugu horaysay shaqadiisa Kormeeraha Guud. Wuxuu la kulmay xubnaha ugu badan ee qoysaska iyo bulshada, ardayda iyo macalimiinta, si oonlayn ah iyo si fool ka fool ah, ilaa intuu suuragalka ahayd.

- Dr. Marrero ayaa si firfircoon ula falgalay lana yeeshay xubnaha bulshada wada hadalo aad u saamayn badan. Kuwaan waxaa ku jira wada hadal la xariira Hoos U dhaca Ardayda Ku biiraysa Dugsiyada, waxaana ku jira xoojinta doorka iskaashatada bulshada.

- Dr. Marrero ayaa si guul leh u hagay wada xaajoodyada lala galaayo Waaxaha Gorgortanka ee Guud ee Degmada ayadoo aan carqalad muuqata loo gaysan shaqada maalinlaha ah ee Degmada; ayna ku jiraan, xaqiijinta in dhammaan waaxaha gorgortanka ay kamid noqdaan shaqaalaha ugu mushaarka badan marka loo eego degmo dugsiyeedyada aaga bartamaha.

- Dr. Marrero Ayaa muujiyay daacadnimo shaqo oo heerkeedu sareeyo, hal abuur wuxuuna muujiyay inuu xil gaar ah iska saaraayo hormarinta dhaqanka ka jira Degmada.

*Fursadaha Kobaca*

- Gudiga ayaa codsanaaya in Dr. Marrero uu xiliga loo asteeyay kusoo wargeliyo xubnaha Gudiga marka xubno gaar ah oo kamid ah Gudiga ay qabaan codsiyada xogta iyo macluumaadka, iyo marka xubnaha gudigu ay u diraan talo soojeedin wax dhisaysa. Tusaale, waxaa jiri karay hufnaan badan oo ku xeeran codsiyada dib u habaynta xogta oo la xariirta wax isbadabo marin ka jirta dadka shaqada la siiyo iyo kuwa shaqada laga cayriyo (isirka, jinsiga, qoomiyada, da'da, iwm.). Hadda kadib, tabashooyinka la xariira xog siinta Gudiga ayaa lagu qiimayn doonaa Xadiga Awooda Fulinta ee lambar 4.

- Gudiga ayaa ka codsanaaya in Dr. Marrero uu ka shaqeeyo kor u qaadista sumcada iyo xariirada dadwaynaha si loo kobciyo sumada Degmadu ku dhex leedahay dadwaynaha. Kormeeraha Guud waa inuu dhaqan gashaa istaraatiijiyada wargelinta dadwaynaha oo oo intaan ka dedaal badan (marka ay jiraan mawduucyo xasaasi ah, iwm) si ay u noqdaan kuwo kasii hordhacaaya wararka halkii ay noqon lahaayeen kuwo jawaa celin ah. Hadda kadib, tabashooyinka la xariira Sumcada Degmada ayaa lagu qiimayn doonaa Xadiga Awooda Fulinta ee lambar 17.

- Gudiga ayaa dalbanaaya in Dr. Marrero laga doonaayo inuu xaqiijiyo in DPS ay sii wado inay si heer sare ah ula shaqayso bulshada, asagoo ilaalinaaya mabda'da hanaan ay bulshadu hagayso Degmaduna taageerayso.

- Gudiga ayaa codsanaaya in Dr. Marrero uu ka qaybgeliyo DHAMMAAN xubnaha Gudiga inay qayb ka noqdaan fursadaha dadwaynaha si ay u matalaan DPS.

***Gabagabadii***

Guddiga Waxbarashada ayaa cuskaday dukumiintiga Qiimaynta Iskiis ah ee Kormeeraha Guud iyo warbixinnada kormeerka waxayna kusoo afjareen in dhammaan cabirada laga guul gaaray hormarna laga sameeyay gaarista Xeerarka Higsiga ee Gudiga. Gudiga Waxbarashada ayaa rajaynaaya inuu arko hormar muuqda oo laga gaaro natiijooyinka ardayda uuna soo gudbiyo Dr. Marrero iyo degmadu.

Lifaaqa Qiimaynta Iskaa ah ee Kormeeraha ayaa laga heli oonlaynka hoose:

https://drive.google.com/file/d/1fdfWQgXOrCh7354QbVsq5KKDWOV7Bfvx/view?usp=sharing

WORDSMITHING ku jira qiimaynta iskaa ah:

- U badel “subgroup (koox doceed)” kooxo kala gaar ah
- U badel macalinka badelka ah macalin marti ah si loo waafajiyo Degmada